Somali

# Baaritaanka Ilmaha Dhasha ah

## Loogu Talagalay Dadka Waalidiinta Noqonaya



## Ka caawinta carruurta inay nolosha ku bilaabaan ladnaan

Qof kasta oo waalid noqonayaa wuxuu rabaa ilmo caafimaad qaba. Baaritaanka ilmaha hadda dhashay ayaa ka baaraaya carruurta jirooyin qatar ah ee inta badan aan la arki karin markay dhashaan. Jirooyinkan ayaa lagu heli karaa iyada oo la baaro dhibic dhiig, maqalka, iyo qiyaasta garaaca (oximetry screening). Haddii jiro waqti hore la helo iyada oo loo maro mid ka mid ah baaritaannadan, wax-ka-qabadyada horraanta ah ayaa ka caawin karta carruurta bilow nolol caafimaad qabta.

**Baaritaanka dhibicda dhiigga** ayaa ka eegta in ka badan 50 jiro oo dhif ah laakiin la dawayn kara oo saamayn ku leh habka difaaca jirka, sida jirku tamarta u sameeyo, ama talaabooyin kale ee muhiim ah. Hore u helitaanka ayaa ka hortagi karta dhibaatooyin qatar ah ee caafimaad ama xitaa dhimashadaba.

**Baaritaanka maqalka** ayaa ka baara  maqal-beelka heerka hadalka la maqlo. Ogaanta maqal-beelka oo xilli hore ah ayaa waxay hagaajineysaa fursadda carruurtu u helaan awoodda ku hadalka luqadda iyo horumarinta ay u baahan yihiin si ay jiilkooda wax maqla ay barbarkooda socdaan.

**Baaritaanka qiyaasta garaaca (oximetry screening)** ayaa eegta xannuunka wadnaha lagu dhasho ee qatarta ah (CCHD). Haddii goor hore la ogaado, carruurta qaba CCHD ayaa inta ugu badan lagu dawayn karaa qalliin ama wax ka qabadyo kale ee caafimaad.

Baaritaanka ilmaha dhasha ah ayaa suurtagal ka dhigaysa hore u aragga, soo helka dhibaatada iyo wax ka qabadyada iyada oo siinaysa caruurta dhibaatadu haysto ku bilow nolol caafimaad.

# Sheekadii Greta

*"Ma'anaan ogaan laheyn inuu wax qaldan yahay illaa uu ka noqon lahaa goor aad u danbeeyo."*

Gabadheena waxay ku dhalatay dhiibtaada hoormoon yaraanta (congenital hypothyroidism), oo ka hor intaan la bilaabin baaritaanka baahsan ahayd sababta ugu badan ee keeni jirtay koriismada habsaamta ee laga hortagi karo. Xaaladeeda ayaa markii ugu horaysay lagu ogaaday baaritaankeedii ilmaha dhasha ah maalmo ka hor dhalashadeedii, oo taas awgeed, ayay hadda iyadu leedahay fursadaha sida dhallaan kasta oo kale inay ku korto caafimaad.

Si kasta oo ay tahay waan ku jecelnnay sidaas, laakiin ka fikirka inay ku dhibaatoon lahayd waxka hortag leh waa wax adag in laga fikiro. Waxay ahayd ilmo hurdo badan, degan, oo caafimaad ka muuqdo markay dhalatay; oo haddii aan la baari lahayn, ma anaan garaneen inuu wax ka khaldan yahay illaa ay noqon lahayd goor aad u danbeeyo.

Iyada oo isla markiiba natiijooyin laga helay Waaxda Caafimaadka Minnesota iyo dabagalka dhakhtarka carruurta ee ilmahayaga oo xaqiijiyay natiijada waxa la helay, hadda wey ku sii fiicnaanaysaa dawada, oo sidii hore wey ka firfircoon tahay oo ka feejignaan badan tahay. Baaritaanka Ilmaha Dhasha ah ayaa waxtar noocaa ah u yeeshay gabadhayada. Natiijooyinkeeda, iyo dawaynta dhakhsaha lahay tallaabadda ay ku dhaqaaqeen, ayaa ah mid wax u taray awoodeeda ay ku korto adkaan, caafimaad, iyo farxad inay yeelato illaa inta kartideeda ah.

Anaga ahaan, baaritaankeeda markay dhasha ahayd ayaa ah waqtiyadii ugu muhiimsanaa ee nolasheeda.

Wixii sheekooyin dheeraad ah ee qoyska ku saabsan, booqo:
www.health.state.mn.us/newbornscreening/families/stories/index.html

..................................

Si aad wax intaa ka badan uga barato baaritaanka ilmaha dhasha ah ama fursadahaaga waalidnimo, weydiiso bixiyahiina daryeelka caafimaadka, isbitaalka shaqaalaha, ama Barnaamijka Baarintaanka Ilmaha Dhasha ah ee Minnesota halkan ku yaal:

www.health.state.mn.us/newbornscreening
(651) 201-5466* ama (800) 664-7772*
* waxa la heli karaa turjumaanno

DEPARTMENT OF HEALTH

ID# 54086 • REV 06/2017